QABYAALADDA

WAXYAABAHA BULSHADA AMA DADKA WALAALAHA AH KALA FOGEEYA, SABABNA U NOQDA IN DIINTA LAGU DHAQMI WAAYO OO LA HALAAGSAMO:

1. Daggalka, 2.Khilaafka, 3. Qabyaalada, 4. Is-xaqirida, 5. Is-ceebaynta, 6. Malaha, 7. Xanta, 8. Basaasnimada, 9. Naanneysta, 10. Is-dhaca, 11. Xaasidnimada, 12. Kaftanka Xun. Dhamaana Waa wax Allaah SWT uu Dadka ka xaaraantinimeeyey oo Reeban.

Bal aynu soo qaadano Diinta Islaamku waxay ka tidhi Qodobada aan kor ku xusnay:

BUUGAN WAXAA EDIT GAREEYEY OO HABEEYEY ABDIRAHEM SAED DUALE LAKIN QORAALKU WUXUU U DHOWRANYAHAY ALIMUSE.NET

Waxa halkan Allaah SWT uu ku xusayaa dadka muslimiinta ah hadii qaarkood khilaaf & xurguf iyo dhibaato ay dhexmarto sida loo dhamaynaayo. Markaas waa amuurta Ijtimaaciga ah ee Muslimiinta dhexdooda. Hadii qaar ka mida oo kuwan ayadahan soo socodaa kuway tirinayaan ka midyihiin aynu soo qaadano, waxaa kamida in uu Nabigu (S.C.W) uu diidaday in dadku kala tagaan, tusaale ahaan, laba qof baa wax isla yara seegaya oo afkay isku buurayaan dibna uma wada hadlayaan, taasna waa ladiiday oo waa wax reeban.

Waxaaba Rabbi uu ku sifeeyay dadka Muslimiinta ah inay isu dabac sanyihiin oo ay isjecelyihiin. Sida Rasuul keenii kasoo

aroortay (SCW) maaha qofka Muslimka ahi inuu walaalkii saddex cisho wax kabadan u cadhaysnaado oo calool xumo u hayo, saddexdaas cisho hadii ay dhaafto waa inuu mid kood ka-kale salaama, hadii markaas isagu diido (kii lasalaamay) isagaa lawareegaya dambiga laakiin kan wax cafiyay sidaas buu ku xil baxayaa. Rasuulku SCW isagoo dadka Musliminta u sheegaya samaanta iyo wanaaga aad dadka dhex dooda ka samaysaa darajada ay leedahay wuxuu yidhi: **"Waar maydin tusiyaa wax ka qiimo badan darajada lagu gaadhaayo Soonka, Salaada & Sakada markii ay haa yidhaah deena: Wuxuu ugu jawaabay: Waa umada dhexdooda oo la hagaajiyo". Micnaha waa dadka muslimiinta ah qabaa'ilkooda, shakhsiyaadkooda & kooxohoodaba".**

Dadka Muslimiinta ah ee xurguf ay dhex dooda martana wuxuu ku tilmaamay: waa tii xiiraysay (Al-xaaliqa) odhan maayo way xiirta laakiin diintay xiirtaa buu yidhi.

Dagaalka & Khilaafka

Ayadan wuxuu Rabbi SWT kula hadlayaa haday laba Qolo oo muslimiin ahi dagaalamaan Waxa layeelayo: **AlleSubxaanahu Watacaalaa wuxuu yiri:**

وَإِن طَآئِفَتَانِ مِنَ ٱلْمُؤْمِنِينَ ٱقْتَتَلُوا۟ فَأَصْلِحُوا۟ بَيْنَهُمَا ۖ فَإِنۢ بَغَتْ إِحْدَىٰهُمَا
عَلَى ٱلْأُخْرَىٰ فَقَٰتِلُوا۟ ٱلَّتِى تَبْغِى حَتَّىٰ تَفِىٓءَ إِلَىٰٓ أَمْرِ ٱللَّهِ ۚ فَإِن فَآءَتْ
فَأَصْلِحُوا۟ بَيْنَهُمَا بِٱلْعَدْلِ وَأَقْسِطُوٓا۟ ۖ إِنَّ ٱللَّهَ يُحِبُّ ٱلْمُقْسِطِينَ ﴿٩﴾

“Haday Laba qolo oo Mu’miniinta ah dagaallamaan heshiisiiya dhex-dooda, Haday midu ku xadgudubto tan kale la dirira tan xadgudubtay intay amarka Alle uga noqoto (xaqa aqoonsato), Haday u noqotana si caddaalada ah u wanaajiya dhexdooda una Garsoora, Alle wuxuu jecelyahay kuwa garsoore”. (Al-Xujuraat:9)

MU'MINIINTU WAA WALAALLO EE WANAAJIYA

Alle Subxaanahu Watacaalaa wuxuu yiri:

إِنَّمَا ٱلْمُؤْمِنُونَ إِخْوَةٌ فَأَصْلِحُوا۟ بَيْنَ أَخَوَيْكُمْ ۚ وَٱتَّقُوا۟ ٱللَّهَ
لَعَلَّكُمْ تُرْحَمُونَ ﴿١٠﴾

"Mu'miniintu waa uun walaalo, ee wanaajiya walaalihiin dhexdooda, Eebana ka dhowrsada, waxaad u dhawdihiin inuu idiin naxariiste". (Al-Xujuraat:10).

Alle Subxaanahu Watacaalaa Waxa kaloo yiri:

وَيَقُولُ ٱلَّذِينَ ءَامَنُوٓا۟ أَهَٰٓؤُلَآءِ ٱلَّذِينَ أَقْسَمُوا۟ بِٱللَّهِ جَهْدَ أَيْمَٰنِهِمْ ۙ
إِنَّهُمْ لَمَعَكُمْ ۚ حَبِطَتْ أَعْمَٰلُهُمْ فَأَصْبَحُوا۟ خَٰسِرِينَ ﴿٥٣﴾

"Waa Dad u nugul Muuminiinta, ku ad-adag gaalada". (Al-Ma'ida:53).

YASIDA & IS CEEBAYNTA WAA LAYSKA REEBAY


Allaah Subxaana Watacaala isagoo ka hadlaaya Qabiilka, is-xaqirida, is-ceebeynta iyo Naanneysaha layskugu yeedho wuxuu yiri:

يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُوا۟ لَا يَسْخَرْ قَوْمٌ مِّن قَوْمٍ
عَسَىٰٓ أَن يَكُونُوا۟ خَيْرًا مِّنْهُمْ وَلَا نِسَآءٌ مِّن نِّسَآءٍ عَسَىٰٓ أَن يَكُنَّ خَيْرًا
مِّنْهُنَّ ۖ وَلَا تَلْمِزُوٓا۟ أَنفُسَكُمْ وَلَا تَنَابَزُوا۟ بِٱلْأَلْقَٰبِ ۖ بِئْسَ ٱلِٱسْمُ
ٱلْفُسُوقُ بَعْدَ ٱلْإِيمَٰنِ ۚ وَمَن لَّمْ يَتُبْ فَأُو۟لَٰٓئِكَ هُمُ ٱلظَّٰلِمُونَ ﴿١١﴾

"Kuwa xaqa rumeeyow Qolana yeyna qolo yasin inay ka khayr badanyihiin baa laga yaabaaye, Ragna Rag (kale) yuuna yasin waxay u dhawdahay inuu kaa khayr badanyahaye, Haweenayna yayna Haweenay yasin waxay u dhawdahay inay ka khar badanyahaye, Hana ceebeynina Naftiina, Hana isugu dhawaaqina naanays xun, Waxaa xun magaca Faasiqnimda iimaan kadib,

ciddaan towbad keeninna waa Daallimiin”. (Al-Xujuraat:11).

Malaha, Xanta & Basaasnimada Waa Xaaraan Waana Layska Reebay


يَٰٓأَيُّهَا ٱلَّذِينَ ءَامَنُواْ ٱجْتَنِبُواْ كَثِيرًا مِّنَ ٱلظَّنِّ إِنَّ بَعْضَ ٱلظَّنِّ إِثْمٌ ۖ
وَلَا تَجَسَّسُواْ وَلَا يَغْتَب بَّعْضُكُم بَعْضًا ۚ أَيُحِبُّ أَحَدُكُمْ أَن
يَأْكُلَ لَحْمَ أَخِيهِ مَيْتًا فَكَرِهْتُمُوهُ ۚ وَٱتَّقُواْ ٱللَّهَ ۚ إِنَّ ٱللَّهَ تَوَّابٌ
رَّحِيمٌ ﴿١٢﴾

“Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawrsada wax badan oo mala ah, maxaa yeelay malaha qaarkii waa dambi, hana is jaajuusina, qaarkiinna qaar yuusan xamanin, miyuu


jecelyahay midkiina inuu cuno Hilibka walaalkii oo mayd ah, waad necebtihiin arintaa, Eebana ka dhawrsada waa toobad aqbale naxariiste”. (Al-Xujuraat:12)

Ilaahay SWT wuxuu Aayadan ku cadeeyay in Mala-awaalka, Isjaajuusida, Xanta iyo Isceebeynta intuba wax reeban oo Alle dadka ka madnuucay yihiin. Markaas waa in layska jiraa qofkii Alle ka baqayoow iska jir waa kaa xaaraane. Waxba kuu tarimayso Ruux walaalkaa ah oo aad xamato, ceebayso ama aad wax xun aad ku malaysid adigoon hubin, hadaad dayn waydana adiga uun bay hadhowto kugu soo noqon doontaa oo maan odhanin iyo waa laga been sheegay iyo nacnac iyo dhulkoo ku soo yaraada ayuun baad ku dambayn doontaa. Alle na wuxuu ku tilmaamay xanta adigoo walaalkaa hilibkiisa cunaaya oo kale. Runtii xantu wax sahlan maaha ee halayska jiro intii karaankiina ah. Allaahu Aclam.

Xadiis uu Abuu Hurayrah (A.K.R.) Warinaayo wuxuu yidhi: Nebigu (S.C.W.) Wuxuu yidhi: Iska illaaliya malo awaalku waa wax been u weyne. (Bukhaari & Muslim).

Xadiis kale oo isna Abuu Hurayra (A.K.R.) Warinaayo wuxuu yidhi: Nebigu (S.C.W.) Wuxuu yidhi: Qofka waxaa shar ugu filan inuu yaso walaalkiisa Muslimka ah. (Muslim).

Allaah Subxaana Watacaala isagoo la hadlaaya dadka wax xanta wuxuu yidhi:



"Waxaa hoog u sugnaaday mid kastoo Xan iyo Ceebeyn badan". (Al-Humazah:1)

<u>Qabiilka ayuu Alle Subxaanah Watacaala ka hadlayaa isagoo leh:</u>

Alle Subxaanahu Watacaalaa Waxa kaloo yiri:


يَٰٓأَيُّهَا ٱلنَّاسُ إِنَّا خَلَقْنَٰكُم مِّن ذَكَرٍ وَأُنثَىٰ وَجَعَلْنَٰكُمْ
شُعُوبًا وَقَبَآئِلَ لِتَعَارَفُوٓا۟ ۚ إِنَّ أَكْرَمَكُمْ عِندَ ٱللَّهِ أَتْقَىٰكُمْ ۚ
إِنَّ ٱللَّهَ عَلِيمٌ خَبِيرٌ ١٣

"Dadow waxaan idinka abuurray lab iyo dhadig (Aadan & Xaawa), waxaana idinka yeelay shicibyo iyo qabiilooyin si aad isugu aqoonsataan, Ruuxase ugu sharafta badan Alle agtiisa waa ka idiinku dhawrsasho badan".(Al-Xujuraat:13)

Aayadan Qur'aanka wuxuu Alle ku cadeeyay oo yidhi waxaan idinka oo dhan idinka khalaqanay Aadaan iyo Xaawa (C.S), markaas kadib ayaan idinka dhignay shicibyo usii kala qaybsami doonta qabiilooyin, waxaan sidaas u yeelnay inaad is aqoon sataan oo qaraabadiina garataan oo is xidhiidhisaan oo qof walba qofka ehelkiisa ah uu xidhiidh gaara ku xidhiidhiyo. Rabbi ma dhinhin inaad dirirtaan, Rabbi ma dhihin inaad is-dhacdaan, Rabbi ma dhihin inaad wadan-wadan iskugu duushaan. Laakiin Rabbi SWT wuxuu yidhi inaad is aqoon sataan oo is xidhiidhi saan baan shacbiyo iyo qabiilooyin idiinka dhigay. kuligiina isku aabo iyo hooyo ayaad tihiin, qabiil laan dheere la yidhaahdo Alle ma sheegi Subxaana Watacaalaa. Qabiil meel gaara ka yimid oo aan dumarkiisu guursi galin na Alle SWT ma sheegin, Qabiil Midgo la yidhaah oo dadka kale ka hooseeyana Alle ma sheegin Subxaana Watacaala ee wuxuu

yidhi kuligiin waxaad ka soo fircanteen Nin iyo Haweenay xagood.

Allaah SWT wuxuu yidhi dhamaantiin waxaad ka timaadeen Aadam & Xaawa (C.S), idinkuna Carruurtii Aadam ayaad tihiin. Aadamna carada ayaa laga Abuuray. Nabeguna (SCW) wuxuu yidhi Aadam waxaa laga abuuray Caradda aduunka oo dhan, caradda aduunkuna way kala midaba duwan tahay oo midi waa casaan, midi waa cadaan, midi waa madoowdahay, midina waa isku dhafan tahay. Sidaas awgeed ayuu ilma aadaamku uu mid nooc gaara u eegyahay oo midabada u kala duwanyahay. Markaas midabka iyo quruxdaba Ilaahay baa bixiya oo qofba in ka siiyay Rabbi baana sidaas ugu talagalay. Markaas waa in qof walba wuxuu Rabbi siiyay ku mahadiyaa. Qabyaalada, Is-xaqiirida iyo xumaanta oo dhana waa in layska joojiyaa cidii Alle ka baqaaysaa ee naxariista Rabbi rabtaa.

XAASIDNIMADA

Allaah SWT isaga oo la hadlaaya dadka wax xaasida een waxba u quudhin dadka kale wuxu yidhi:

أَمْ لَهُمْ نَصِيبٌ مِّنَ ٱلْمُلْكِ فَإِذًا لَّا يُؤْتُونَ ٱلنَّاسَ نَقِيرًا ﴿٥٣﴾

Dadka ma waxay ku xasdaan nicmadda Alle ugu deeqay?. (An-Nisaa:53).

Xadiis uu Abuu Hurayra (A.K.R.) Warinaayo wuxuu yidhi: Nebigu (S.C.W.) Wuxuu yidhi: Iska Jira xaasidnimada, maxaa yeelay xaasidnimadu waxay u cuntaa xasanaadka sida dabku u cuno xaabada. (abuu Daawuud).

Qeexida Qabyaalada

Runtii qabyaalada dadka Soomalidu ku dhaqmaan waa wax aad u fogaaday si sahlana aan loo joojinkarin, lakiin waa layeerayn karaa.

Marka hore waxaad kala fahan taa Qabiil iyo Qabyaalad, hadii aynu sharax yar oo gaaban ka bixino waa laba wax oo aad u kala duwan intabadana dadka qaar iskaga khaldama.

Qabiil

Qabiil waa koox bulshada ka mid ah kuwaas oo wadaaga abtirsiin kooban, waxaanay u si qaybsamaan Jilibo, Qoysas ugu danbayn

waxaa kala baydha oo reero kala noqda laba Nin oo walaalo ah markay inama badan dhalaan ee inamadiina caruuro sii yeeshaan. Markastoo tirada abtirsiinta qoysku gaadho laba saddex awoow waxay isku badashaa jilib yar oo hoose, dadka walaalaha ahi markay guursadaan ee ay caruur sii dhalaan caruurtoodu waxay isku noqdaan ilmaadeer1, ilmaadeer2, Ilmaadeer3 xaga aabaha. Kadib wixii intaas ka danbeeya waxay isku badashaa **"Tol"** halkaas oo hadana qabiilkii kor uga unkamo oo uu marka hore noqdo jilib yar oo hoose deedna Qolo,Qabiil.

Badanaa isxidhiidhinta qaraabonimo & iscaawintu wuxuu isku taagaa ilmaadeerka 3aad wixii intaas ka danbeeyana waxa laysku noqdaa uun tol taas oo micnaheedu yahay waxaa yimid habkii Qabiilka oo magta iyo xeerarka qabiilka uun lawadaago. ilaahay SWT isagoo ka hadlaaya qabiilka wuxuu yidhi:**Dadoow waxaan idiinka abuuray lab iyo dhadig, waxaana idiinka yeelnay**

shucuub iyo qabiilooyin si aad isugu aqoonsataan, ruuxiise ugu sharaf badan Eebe agtiisa waa ka idiinku dhawrson”49:13

Qabyaalad

Qabyaaladu waa hab Somalidu cadeeysatay oo ay mudo dheer ku soo dhaqmayeen kaas oo lagu amaanaayo qoys ama qabiil, qabiil kalana lagu yasaayo laguna caayaayo oo lagu fogeeynaayo. Marka qabyaalada la’oogaayo waa marka larabo in qolo kale la dulmiyo laguna hamiyo jiritaanka qabiilka aad tahay oo qudha lagana diriro jiritaanka bulshada inteeda kale. Qofku malaha ma'adi uu isagu rumaysanyahay inay sax tahay iyo nadaam bulsho oo kale midna ee wixii qabiil kiisa ka soo fula ayuunbuu sax u arkaa waxa umada kalena qalad.

Dhibaatooyinka ay arintaasi abuurto waa dhibaato aad u weyn waxana kamida arimahan soo socda:

- **Bulshada oo noqota umad dulmi iyo darxumo ku noolaata waligeed.**
- **Jaahilnimada oo noqota mid lagu faano.**
- **Xaqa & Cadaalda oo noqota in daciifnimo loo arko.**
- **Bulshada oo aan waligood is aaminin shakina kala qabta markasta.**
- **Danta guud iyo Dawladnimada oon waligeed si daacada loogu heshiin, qofkastaana diido cidii madax loo doorto hadii anu qabiilkiisa ahayn, kuna diido qabiilkiisa awgii, iyadoo laga yaabo ka reer kooda ah ee uu jagada larabo in uu yahay mid aan xilka loo dhiibayo u qalmin.**

- **Marka ay dorasho noqoto in qofku dantiisa ilaawo oo uu ka fikiro dan qof kale oon waxaba ka quseyn dorashadana qof qabiil ku doorto halkaasna dantiisii iyo xornimadiisii ku waayo.**
- **Hogaamiyaha dalka loo doorto & Masuuliyiinta kalaba inay waxay doonaan oo xumaan ah, sameeyaan cidna ka baqiwaayaan illayn waa umad qabyaaladi qaybisay oo awoodi iyo sharaftiiba ka qaadaye.**

Hadaba qabyaaladu waa isxaqirid, isdulmin, iyo sharciga islaamka oo lajabiyo taasina waa xaaraan cad oo cidii sidaas u dhaqanta ama ku fikirta uu ifka dulmi iyo duli ku noolaanayo akhirana cadaabta jahanama tagaayo siduu ilahay inoo sheegay. Allahna (SW) wuxu inoo sheegay in umada muslimiinta ahi ay dhamaan walaalo yihiin, markaas dad isku qabiila oo wada dhashayna hadalkoodaba daa.

Akhristow miyaad qodobada xaga sare ku qoran & kumanaan kale oo aanan halkan ku soo koobi karin igu diidantahay? Waxaan aamin sanahay inay jawaabtu tahay maya. Hadaba marka aynnu ogsoonahay waxa dawladnimadeena iyo horumarka dalkeena hortaagani inuu yahay qabyaaladda iyo qabiillaysiga uu qof walba iyo qabiil walba wax ku doonaayo ay tahay, ee inaga oo wadaniyiintii wadanka iska lahayd ah, maxaa sababay in kolba ka madax weynaha aynu u doorano uu inoo khiyaameeyaa? ee hantidada umada oo dhami ka gaajoonayso uu siduu doono ugu tagrifalaa? ama inanka yar ee aynu xafiiska cashuuraha ama meel illaha dhaqaalaha ah u dhiibanaa uu xaqeena u lunsadaa? ma iswaydiiseen su'aalahan? mise waxaabad tahay ka aan ka sheekaynaayo?.

Runtii waxa aan sheegaayo oo dhami waa wax jira oo aan soo xaqiijiyay, waxba kama helaayo inaan madaxda dalkayga iyo

masuuliiinta dalkayga fadeexadeeyo. Xaqiiqadu waxaa weeye inaynu maanta dhibaatada inahaysta hadii aynu soomali nahay dhanka aad doonto kasoojeedo, waxaa inala gudboon in aynu si dhab ah ugu fiirsano mushkilada ina haysata ee waligeedna soo jirtay, oo ka talino bal aayaha ubadka kobabkeena ku jira, kolay inagu nolasheenii baabi'inaye.

Waxaad moodaa inaynaan laba socon caalamkan casriga ah. Wali waxaynu ku jirnaa meel mugdi iyo jaahilnimo ah oo dunidu boqolaal sano ka hor soo dhaaftay taas oo ah, qabiil-qabiil & qabyaalad indha la'aan ah. Umada inay ku dhacdo mushkilad ah in ay qofkii ay xilka u dhiibteen khaladka uu galaayo ka joojin kari waayaan ama kalidii taliye qabsado (Dictatorship) waxaa u sabab ah in shicibku kala qaybsan yahay oo iska soo horjeedo. shicibkuna hadii aanu is raacsanayn oo danta guud & dawladnimada ka midaysnayn, cid kastaa gumaysan karta oo

xukumi karta, waxy doontana ku samayn karta. Umad midaysan kuma dhacdo dhibaatada inahaysta oo kale.

Gabogabo, walaalayaal aynu si wanaagsan oo caafimaad qabta u fahano dhibta inoogu xun ee dhibaatadeena u salka ahi inay tahay Qabyaalada aynu ku dhaqmayno iyo siday wax inoo yeelayso ee ay ula fal galayso ficil kasta oo aynu sameeyno, hadii ay dawlad tahay, hadii ay diin tahay, cadaalad darada ina haysata dhan walba waxa nolasheena hortaagani waa qabyaalada iyo qayb qaybsanaanta anu midna kakale waxba u ogalayn. Qabiilka iyo is haybsigu dhib malaha sidaynu horeba u soo sheegnay.

QAYBTA 1AAD

Maxaa Sababay in Soomaalidu Qabyaaladda ku Dhaqanto?

Dhaqankii Miyiga ee Jaahilnimada:

Shaki ma laha, in dadka soomaaliyeed ay qabyaaladda ku dhaqmaan kuna soo dhaqmi jireen waligood. Laakiin ma odhan karo, waa umada keliya ee qabyaaladda ku dhaqantaa kuna soo dhaqmi jirtay ee maanta adduunyada ku nool ama afrikaba degan. Waayo, hab dhaqameedkan waxay soomaalidu la wadaagtaa, umada kale oo la daris & diinba tahyay iyo weliba waddamada soo koraaya intooda badan.

Waxaase in la isweydiiyo mudan, maxaa u sabab ah, in ay soomaalidu qabyaaladda ugu dhaqanto ama ay u adeegsato; si aad u foolxun oo umadnimadeeda iyo Islaamnimadeedaba halis

ku ah? Maxayse qabyaaladdu uga xoogroonatay Diintooda & Dadnimadoodaba?.

Jawaabtu kolley uma fududa sida su'aashu ay u muuqato. Balse aan isku dayno, in aan si caqligal ah u sababayno dhowr qodob oo la odhan karo waa u sal arintaas, oo ay ka midyihiin:

1) Xaaladda joqoraafiyeed ee dhulka ay soomaalidu dagto oo cimilo ahaan qalafsan.

2) Xoolaha (meesiyada) ay soomaalidu dhaqato siiba Geela;

3) Abtirsiinta la abtirsanaayo, ee ah tirinta silsilada ama taxanaha magacyada awooweed ee qofku xafidaayo.

4) Doorkii ay gumaystayaashu ka qaateen qabyaaladda & kobcinteeda ee ay beelaha kala qoqobeen.

5) Siyaasadayntii qabyaalada ee xukuumadihii hore ee soomaaliya gaar ahaan tii Siyaad Bare.

6) Iyo Loolanka siyaasadeed ee reeraha waaweyn dhexyaal oo beryahan dambe sii soofeeyay qabyaalada.

7) Ma’aadida diinta Islaamka oo dadka soomaliyeed badankooda ay afka uun katahay laakiin anay rabin inay si toosa ugu dhaqmaan, kana run sheegaan (micnaha xukun ka dhigtaan)

Kaalinta Xaalada Joqoraafiyeed ka Ciyaarto Qabyaaladda Soomaalida.

Inkasta oo dhulka soomaalidu degtaa uu ku dhaco joqoraafi ahaan, dhulbadhaha iyo agagaarkiisa, hadana malaha dhulka soomaalidu intiisa

badani xaalada cimilo ee lagu yaqaano dhulka badhaalaha ah iyo ta kulaylahayaasha toona.

Culimada cilmiga joqoraafiguna, waxay raaciyaan cimilada dhulka soomaalidu degto ta lamadegaan-u-eekaha. Waayo, cimilada dhulkeenu inta badan waa xilliyood leh afar xili oo kala ah: **Gu, Xagaa, Dayr** iyo **Jilaal** iyo weliba roobyaraan ama roob la'aanba xiliyada intooda badan.

Waxaana lagu doodi karaa, in xaaladdan cimilo ee adagi ay atahay ta salka u ah **Reerguuraanimada** soomaalida & xoolodhaqashadaba. Sababtoo ah, roob yaridu waxay keeni kartaa, in aanu qofku noqon beeraley meel degan. Hadii uu beeraley noqdana, aanu noqon beeraley ku tiirsan nolol ahaan dalaga beerta ka soo baxa oo kali ah.

Waayo, mar hadii roobku xilliyood yahay oo aan laysku halayn Karin, beertuna waxay noqonaysaa wax aan lagu kalsoonaan Karin. Macnaha

aynu taas ulajeedna waxaa weeye, in dhulka cimiladiisu sidaa tahay ay xooluhu kaga fiican yahiin beerashada iyo beeralaynimada.

Dhinaca kale hadii aynnu ka eegno, hadii aanu roobku ku di'in halka aad dagan tahay; xoolaha waxaad ula guuri kartaa halka dooga iyo biyaha leh, beertuse kuu socon mayso kuna doogdhabi karimaysid halka dhibicdu ka hoortay. Sidaa aan dalaga ama beerta loo doogdhabi karahayna waxaa inoo caddayneynsa, tixdan calaacalka ah ee uu tiriyay nin soomaaliyeed oo beeralay ahaa, wuxuuna yidhi: **"Cirka meel dushaada ah illayn dooxid lama gaadhid, oo illayn hadhuudh laguma doogdhabo roob aan kugu daadan**". Isla-markaasna waxa ay tahay xaaladdan cimilo ee dhulkeenu ta dhalisay, in ay dadka soomaaliyeed u degaan Geeska Afrika, si baahsan iyo filiqsan oo aan xadaysnayn. Waxa kale oo ay xaaladan joqoraafiyeed sababtay, in aan cidina sugi Karin tirada dhabta ah ee dadka soomaaliyeed. Arintaasi oo ah ta dhalisay, in ay tirada guud ee soomaalidu weligeed ahaato, male'awaal & ku-tidhi-kuteen aan hubaal lahayn.

Xaaladan cimilo ee ba’ani, waxa kale oo ay dhalisaa geedi iyo sugnaan la’aan xaga deegaanka ah. Waayo, xooladhaqashada reer guuraanimda ku dhisan ee teena oo kale ahi, waxay u baahantahay **naqraac** (doojin) xilliyada roobka iyo ceelfadhiisiga wakhtiga jillaalka ah. Labadan xaaladood ee naqraaca iyo ceelfadhiisiguba waxay dhaliyaan xamaasado dagaal iyo gardarro ah oo dhexmara reeraha ama beelaha naqraaca ama ceelfadhiisiga ah iyo kuwii hore u sii daganaa meesha ee deegaanka lahaa oo difaac ah. Mararka qaarkoodna, waxaaba isku dhaca beelaha hayaanka ah laftooda oo daaqa isku laaya. Halkaasna waxaa sida badan ka dhasha hiil iyo habarwacasho keenta dagaal dhiig badan oo layska daadsho oo kadhashay halgankaa nolasha ee ah: ninkii roonow reerka u hadh.

Waxaa kale oo aynu odhan karaa, in ay nolashan adagi tahay ta sababtay, nolashan dhaqan ahaan, in markuu wiil qoys u dhasho loo riyaaqo oo xabado loo rido, gabadhana laga naxo. Waayo, wuxuu wiilku hiil iyo hooba ku soo kordhin jirey nolashaa adag ee colka iyo ciidanka, ceelshubida, carraabaha, iyo kun la cayn ah, oo cisho noolba joogta.

Hadaba wiilku qiimhiisii maanta ma leeyahay?. Waxaynu odhan karaa, wilkii wuxuu noqday maanta mid u taagan, qaad, qiiq, qas, dhac,dil iyo naxdin waagii baryaba joogta oo aan macnolahayn. Waxaanu taagan yahay qiimihiisi ma siinaa gabadha?.

Maxaa Dhibaatada Soomaalida Xal Loogu Waayey?

Yaa u raadiyay horta!

Horta intaynaan su'aashan ka jawaabin, waxaa haboon inaynu isla garano dhibaatada ina haysta hada iyo wakhtiyadii tagay.

Waxaan odhan karaa, umada soomaaliyeed waligeedba qabiilo qayb-qaybsan, oo midba kakale col layahay, oo wax aan macno lahayn ku dagaalama ayay ahayeen. Taasina waa dhibaatada

maanta inaga inahaysta. Soomaalida waxaa cadow goodi wax walba ku sameeyay, ee dhulkoodii bilaashka ku qaatay, illaa maantana bilaashka ku hasyta, ee kaaga darane intii hadhayna kugu haysta, xataa wax kale iska daayo ay maanta itoobiya shanta meelood ee ay midwalba dusha ka xukunto aynu nahay, waa dhibaato ay qabyaaladd & qabiilaysigu inoo gaystay. Laga soo bilaabo 47 sano ee tagay, soomalida waxa ay dawlad hagaagsan oo loo aayo oo caddaalad ku dhisan, u diiday waa qabyaaladda. Dawladii habaarka qabtay ee Siyaad Bare waxa sababay inay 21 sano dadka gumaado waa dadka qabyaaladdu qayb-qaybisay waayo “yay is cunaysaa waraabe iskama cilisaa layidhi”.

Dagaalka sokeeye ee soomaalidu waa mid waligii ilaa maanta is xumayn iyo is xinin ah, oo ka dhex taagan qabiillooyinka weli ku jira dhaqankii iyo dabeecadahii badwaanimada ee qabiillooyinka.

Waana jaahilnimo iyo xumaan layska idha tiraayo oo aan larabin in laxaliyo. Waxa C/llaahi Yuusuf oo habaar qaba, oo dad & dal toona dan ka lahayn madax uga dhigay koonfurta soomaaliya waa qabyaalada iyo qabiillaysiga jaahilnimda ee ay beelaha soomaliyeed u qaybsanyihiin. Daahir Riyaale iyo wasiiradiisa sida indha la'aanta ah sharciga wadanka ugu tumanaaya ee aan cidmna ka baqanahayn, wadanka dhaqaalihiisi curyaamiyay ee horumar & caddaalad u diidanai waa beelaha qabyaaladu lafta kaga wada jirto ee aan naftooda daacada u ahayn.

Hadaba waxba yaanu hadalku ila sii fogaane aan u soo noqdo dulucda hadalkeeyaga. Si aan xalka u garano iswaydii su'aalahan soo socda:

- Qabyaaladu in ay tahay waxa maanta soomaaliya u diiday dawlad hagaagsan oo calamku aqoon sanyahay miyaa laysku diidanyahay@

- In wadajirkii Soomaaliyeed iyo is-dhexgalkii bulshadeed uu tirtiray qabiil, oo maanta aanu jirin qof aanu waxyeeladii qabyaaladdu taaban.
- ·Isweyddiiyoo qabiilka aad ka dhalatay weligaa wax ma ku tareen? Mise iskadaa wax ay ku taraane waabay kugu daneysteen?
- Metalanba haddiiba tolkaa la siiyo waxa ugu qiimaha badan ee dunida yaal, ma ku heshiin lahaayeen
- Lafaha hoose iyo jilibyada uu ka kooban yahay tolkaa? Laftee baa xaq u leh in ay inta badan qaadato, teebaase xaq u leh in loo yareeyo qaybta? Sababtee (WHY?).

- ·Soomaaliyeey Qabiilkee qabaa'ilka kale ka fiican amaba ka sarreeya?
- ·Qabiilkee xaq u leh in uu u taliyo ummadda Soomaaliyeed guud ahaan?
- ·Qabiilkee gaaray isku-fillaansho taama oo ka maarma in uu wax la wadaago Soomaali inteeda kale ama soomaliland ba?

- Ma u malaynaysaa in Soomalida lagu xukumi karo ama wax loogu qaybin karo qabyaalad iyo dhalasho(ethnicity)? Jawaabtu ma tahay maya-maya?
- ·Ummadda Soomaaliyeed ma tahay ummad isku-midab, isku-diin, isku-af, isku-dhaqan, oo weliba iswada dhalay? Waxa keliya oo aanu ku kala duwan nahay ma tahay magacyo dhalanteed ah oo odayaal hore oo reer miyi ah ay inoo kala bixiyeen (waa qabiil)?
- Soomaaliya maanta waa waddanka keliya ee aan dawlad dhab ah lahayn. Miyuusan ahayn qabiilku kan hortaagan dib u nooleynta qarannimadeenna & horumarkeena.
- ·Qabiilku miyuusan ahayn kan na baday sharaf-jabka, qaxootinimada iyo dan darrada nagu habsan ee adduunku u aqoonsaday Soomaali si ay u dhan tahay?
- Qabyaaladdu miyaysan ahayn tan ay maalin walba u geeriyoodaan tira badan oo Soomaali ah oo wax ay galabsadeen ama ay galeen aanay jirin. Qabiilku sow ma aha kan ammin darida, cabsida joogtada ah, gaajada xanuunka badan, iyo darxumada u keenay

ummaddeenna. Kan aqoon yahannadeenii ka dhigay dan laawayaasha?

- Qabiilku miyuusan ahayn kan inoo diiday in aan heshiinno oodhisanno dugsiyo, isbitaallo, jidad iyo warshado iwm. Qabiilku sow ma aha kan dhaqankeennii ku salaysnaa Islaamnimada ku beddelay mid shisheeye oo lid ku ah diinteenna oo gaalinimo ah.
- Marka aad waxaas oo dhan qiimayso, miyaanay kuu muuqan dhibta qabyaaladi inagu hayso?

Haddaba,haddii qabiilku intaas iyo in ka badan oo xummaan ah uu noo geestay, adiguna aad nagu waafaqday, miyaanay kula gudbooneen in aan wadajir ula dagaallanno cadowga keliya ee nagu dhex jira magaciisuna yahay qabyaalad? Jawaabtu waa Allaa I lehe haa-oo-haa. Marka si aan dagaalka u bilowno waa in aan ka bilowno nafteenna iyo guryaheenna. Ku soo biir boqolaalka Soomaaliyeed ee ku dhaqaaqay dib u soo celinta magaca iyo dadnimada qofka & dalalka soomaaliyeed. Talaabadana raac.

***1.*Ku-Dhawaaq in aad ka baxday qabiilka laguugu yeero*.** Adigoo aan ka baqayn Alle mooye cid kale, waxaad si cad oon cabsiyi ku jirin ugu sheegtaa kuwa kugu tirinaaya in aad qabiilkooda tahay, in aad ka baxday oo aad Soomalinimada & Islaamka ka dooratay. Weliba aadan cid kale ka sii ahayn. Iska fur silisiladda qabiilka ee qoorta kuu sudhan oo ka xorow adigoon cid kale ka sugin in ay kaa bixiso. Markaa ka dib ayaad ummaddaada kalena ka furddaamin kartaa qoolka ay gelisay qabyaaladu iyo kuwa aaminsan qabiilaysiga jaahilnimada ah.

***2.*Jooji kaftanka qabyaaladeed. Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa**; Waayeelku kaftankuu ku dana dhameystaa." Kuwa ku kaftamaaya qabyaaladda ka fogow. Waayo waa badow aan sheeko kale aqoon, amaba waa aqoon-gaabyo dan la'aani hayso, oo aan ogaynba khatarta halista ah ee ay naftooda iyo umada kaleba u gaysanayaan. Marka iska jooji in aad la jiibiso oo aad adiguna iyaga ka mid noqoto. Si cad ugu sheeg in aad tahay Soomali ay ummaddiisu u siman tahay. Ogow Soomaalinimadu way ka wax tar badan tahay qabiil hoose. Oo umada Soomaaliyeed ama

Soomaliland oo dhan wixii ay kugu biirin weyday qabiil keliyii ku siin maayo. Kaftanka qabyaaladeed wuxuu dhidibka u sii aasaayaa qabyaaladda. Qabiilka oo lagu kaftamaa waxay la mid tahay jinsiyadda oo lagu kaftamo. Duniduna kaftan jinsiyadeed (racial jokes) waa ay iska madnuuceen. Meelaha qaarna waaba dambi. Waayo waxay ogaadeen xumaanta iyo nacaybka ka dambeeya. Maxaad isugu soo koobeysaa qabiil qura adigoo ummadda aad isku wadanka tihiin oo dhami ay ku walaaleysanayso.

***3.*Jooji murti-qabyaaladeedka.** Haddii aad tahay gabyaa ama heesaa, ka ilaali murtidaada qabyaaladda. Waayo, “Dhawaaqu meel dheer ayuu gaaraa dhagaxna meel dhow.” Ha u gabyin, ha u heesin, ha u buraanburin qabiil. Xirfaddaada u leexi wanaag iyo waxyaabaha bulshada midaynaaya waayo, mar haddaad abwaan ama fannaan ama musikiste tahay waxaa dhab ah in aad Soomaali oo dhan abwaan/fannaan/musikiste u tahay ee aadan qabiil keliya u ahayn. Badi murtida iyo maaweelada qaranka dhisaysa xumahana reebaysa, oo Soomaali oo dhami kaa dhegeysan karto.

***4.*Ha u hoggaamin ummadda qabyaalad.** Haddii aad damacdo in aad ummadda hoggaamiso waxaad tahay birta dhexe ee miisaanka. Waxaa kula gudbboon in aad marka hore tahay nin-qaran oo aadan adeegsan qabyaalad si aad wax u maamusho. “Nin-Qabiil ma hoggaamiyo Qaran.” Ka bilow naftaada, carruurtaada, ehelkaaga iyo qaraabadaa la dagaalanka qabyaaladda. Markaad saafi ka noqota qabiil u soo leexo in aad dawlada wadankaga hooyo hoggaamiso. Sidoo kale ha taageerin hoggaamiye adoo u taageeraya waa nin qabiilkaaga ah darteed oo kaliya. Waxaa ka habboon in mid kaga habboon uu hoggaamiyo ummadda. Qabiilaystuhu, wuxuu aqoon u leeyahy in uu hoggaamiyo qabiil qudha ee ma awoodo in uu hoggaamiyo ummadda oo isku duuban.

***5.*Garddaro qabyaaladeed ha taageerin**. Cid xaq-darro ku socata ha ku taageerin ficilkooda. Ha ka mid noqon kooxo u kacay in cid kale ay soo mooraduugaan oo ay soo dhacaan iyagoo qabyaalad adeegsanaaya. Ha hor kicin oo ha hoggaamin kooxo la mid ah kooxahaas. Ha ka qaybqaadan

duminta ama waxyeelidda qaran-nimada guud waayo, jiritaanka qaranimadu adigay dan kuu tahay.

6.*Ka fogow ka-qaybgalka iyo qabanqaabinta shirarka *qabyaaladeed. Waqtigaaga ku bixi meelaha dantaada gaarka iyo tan guud ee ummaddaada ay ku jirto. Ka qayb gal shirarka dib u dhisidda qaran-nimada ummadda. Waxaad ku dadaashaa in aad ka sheekeyso macaanka qarinimadu leedahay iyo qadhaadhka qabiilku leeyahay. Runta kaga dhawaaq meelaha la isugu yimaado adigoo dhaleeceynaya qabyaaladda, dhibteedadana muujinaaya.

7.Maalkaaga iyo muruqaaga ka mamnuuc qabyaalad. Waad ogtahay in wixii aad ku bixiso qabyaalad in aanay adna dan kuu ahayn ummaddaada dan u ahayn. Weliba Akhiro waxaa laguu haystaa wax kasta oo xumaan-qabyaaladeed oo ka yimaada maalkaaga, muruqaaga iyo afkaaga oo aad ku bixiso taageero qabiil.

8.Iska daa dacaayadaha nacaybka(hateful criticism). Dacaayadaha riqiiska ah af ama qoraal ee bulshada Soomaaliyeed ee aad ka mid tahay iska jooji. Cadiifada qabyaalada ee bulshada kala kaxaynaysa. Waxaad ka digtoonaataa in ay caadifadda qabyaaladu ku beer-qaaddo. Ha u jixin-jixin qabiil gaar ah adigoo u jixin-jixi kara qaranka Somaliland /Soomaaliyeed oo dhan. Ogow, dhammaan ummadda Soomaaliyeed way kuu siman yihiin. Kala saarna mabda'a siyaasadeed iyo soomalinimada. Somalilander ahoow ama konfur soomaliyeed Gaf loo geysto qayb ka mid ah ummadda Soomaaliyeed waxay la mid tahay mid loo geystay dhammaan ummaddu sida ay u dhan tahay. Qir jirintaanka Somaliland iyo jirintaanka soomaliya midba ka kale. Waayo, inaguunbaa walaalo ah, isku cadowna ah.

***9.*Saaxiibbo badan sameyso.** Sameyso saaxiibbo badan oo kala duwan adigoo adeeg sanaayaa dabeecadda, nooca-sheekada, aqoonta iwm. Iska ilaali kuwa la wareegaaya qabyaaladda iyo nacaybka qayb ka mida ummaddeenna. Waayo qof aad ku saaxiibteen qabyaalad waa qof aad ku saaxiibteen godob iyo dhagar ummadeed. Saxiibadaa hanoqdeen kuwa

kugu garab-gala wanaagga. Waa kuwa aad ceeshoo-milix tihiin ee ma aha kuwa aad kula saaxiibtay qabyaaladda. U noqo oo cafis ka doon saaxiibadaadii hore ee waayo-waayo kuwaas oo ay idin kala kaxaysay colaaddii ay qabyaaladu abuurtay muddadii colaadda ummadda.

***10.*Taageer cid kastoo wadda wadajirka umada**. Taageer oo ka mid noqo Ururada samawadayaasha Soomaaliyeed meelkastoo ay joogaan. Ku biiri fikradahaaga waayo waxaad tahay xubin lagama maarmaan ah oo ka tirsan ummadda Soomaaliyeed.

Haddii aad fuliso arrimaha aan kor ku soo sheegnay waxaad ka xoroowday suntii iyo jaahilnimadii qabyaalada. Waxaanad ka mid noqotay **Somalis Against Tribalism** (**S.A.T**). **Ururka Laddagaalanka Qabyaaladda ee Soomaliyeed.**

Wixii faahfaahin ah ama aragti iyo aaraar ah ku soo dir: webmaster@alimuse.com

Allaaha Xaqa ha ina Waafajiyo Dhamaanteen Aamiin.

Q: Ali Muuse